IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho 1da Disember 1986 Lr. 12

## JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 28 ee 25 Okt. 1986, U rogid sharci, Xeer sharci L. 2 ee 8.9.86, Wax ka beddelid Xeerka sharci 2 ee 7.1.84, kuna saabsan Canshuurta gadidda Bog; 725

SHARCI L. 29 ee 29 Okt. 1986, Isbeddelka laad ee Miisaaniyadda Dowladda 1986 » 726

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 32 ee 11 Okt. 1986 soo celin hanti maguurto » 728

### QEYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 22.11.86, Lumid 10 Jeeg War. ku qoran

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 2.11.86, Lumid (2) Jeeg War. ku qoran Faaduma Axmed Xaashi L. 657 » 731

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 2.11.86, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Faaduma Axmed Xaashi L. 758 » 732

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 15.10.86, Lumid Jeeg War. Lr. 0346238 ku qoran Cali Faarax Nuur L. 659 » 733

MAXKAMADDA GOBOLKA W GALBEED 8.11.86, Lumid 11 Jeeg War. ku qoran Maxamed Axmed Seed L. 660 » 734

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 22.11.86, Lumid Jeeg War. L. 731872 ku qoran Cali Xasan Maxamed L. 661 » 735

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 16.11.86, Lumid Buug Keyd L. 2337 ku qoran Cali Daahir Cali L. 662 » 736

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 27.11.86, Lumid Jeeg War. L. 178052 ku qoran Xasan Cilmi Maxamed L. 663 » 737

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 24.11.86, Lumid Jeeg War. L. 0631011 ku qoran Suleemaan Maxamed Cabdi L. 664 » 738

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 24.11.86, Lumid Jeeg War. L. 718648 ku qoran Cabdiraxmaan Maxamed Ciise L. 665 » 739

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.86, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Maxamed Dhicisow Faarax Lr. 665/bis » 740

SOPRAL S.P.A. «SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI, Ogeysiis isu yeerid fadhi caadi aan ahayn L. 666 » 741

ABVISO DI CONVOCAZIONE DELLA ASSEMBLEA STRAORDINARIA L. 667 » 742

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lamb. 28 taariikh 25 Okt. 1986 U rogid sharci Xeerka sharci lamb. 2 ee 8.9.86 wax ka beddelid xeerka sharci lamb. 2 ee 7.1.84 kuna saabsan Canshuurta gadida

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY Oggolaashaha guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda.

### Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay sharci, xeerka sharci lambar 2 ee 8da Setember 1986. wax ka beddelid xeerka sharci Lr. 2 ee 7.1.84 Canshuurta gadidda.

### Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Oct. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci lamb. 29 taariikh 25 Okt. 1986 Isbeddelka 1ad ee Miisaaniyadda Dowladda ee 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELIYEY Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda.

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda Dowlada ee 1986, sida ku cad lifaaqa (A) iyo (B) ee sharcigan.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25 Oct. 1986

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

## L I F A A Q A «A»

### — K h a r a j k a —

| MADAX — XIGE | TILMAAN | QIYAASTA HORE 1986 | ISBEDELKA 1986 | QIYAASTA CUSUB 1986 |
|---|---|---|---|---|
| | Wareejinta Dibadda | 688.182.399 | 3.301.817.601 | 3.990.000.000 |
| 7.1.1 | Dakhliga Dibadda | 2.112.594.810 | 497.405.190 | 2.610.000.000 |
| 7.1.2 | Dakhliga Horumarinta | 2.800.777.209 | 3.799.222.791 | 6.600.000.000 |

## L I F A A Q A «B»

### — D a k h l i —

| MADAX | MADAX-XIGE | TILMAAN | QIYAASTA HORE 1986 | ISBEDELKA 1986 | QIYAASTA CUSUB 1986 |
|---|---|---|---|---|---|
| 1.4.0 | 1.2.8 (D) | Kaalmada Keydka | 50.000.000 | 100.000.000 | 150.000.000 |
| | » (R) | Kharajka kala Duwan | 1.130.000.000 | 1.182.000.000 | 2.312.000.000 |
| | 1.3.0 (B) | Korsaarka Deynta Gud. | 350.000.000 | 100.000.000 | 450.000.000 |
| | » (T) | » »Dibed. | 919.616.000 | 329.299.000 | 1.248.915.000 |
| | 3.2.1 | Bixinta Deynta Gudaha | 60.000.000 | 557.000.000 | 617.000.000 |
| | 3.2.2. | » » Dibeda | 1.681.384.000 | 902.518.601 | 2.583.902.601 |
| | | Isugeyn | 4.191.000.000 | 3.170.817.601 | 7.361.817.601 |

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEINAHA J.D.S. L. 32 ee 11 Okt. 1986 Soo Celin Hanti Maguurto.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad qeybta 14aad ee Dast-rka ee awoodda xeer soo saaridda.

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. 126 ee 8 Maajo 1972 ee Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida ay Wasaaradda Arrima ha Dibaddu u qabto in loo soo celiyo ma guurto gu-ryo ah oo ay horay uga iibsatay Jabuuti.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda.

Qodobka 1aad

Shanta maguurto ee guryo oo ku yaal magaalada Ja-buuti ee iminka ku qoran Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Arrima-ha Dibadda ee J.D.S. maadaama ayadu horay u iibsatay.

: Qodobka 2aad

Guryaha waa in wixii ka haleysan Bankiga hagaajiyo.

Qodobka 3aad

Dhulka banaan ee Safaaraddu leedahay waa in Bankigu dhisaa si ay u galaan Diblomaasiyiinta Safaaradda, Sha-qaalaha Laamaha Bankiga iyo Caymiska, lagana qaado Ijaar macquul ah.

Qodobka 4aad

Kharajka ku baxa hagaajinta guryaha iyo dhismaha dhulka banaan waxaa Bankiga u celinaya Dawladda, wa-xaana la farayaa Wasaaradda Maaliyadda kharaj celintaas Bankigu siiyo markii hawluhu dhamaato.

Qodobka 5aad

Guriga Guddoomiyaha Laanta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Jabuuti ku jirto, waxaa gacanta ku haynayaa Bankiga, inkastoo milkiyadiisa ay leedahay Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

Qodobka 6aad

Shaqada la xiriirta jaangoynta iyo qeymeynta waxaa si wada jir ah u xil saaran Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed iyo Safaaradda J.D.S. ee Jabuuti, waana in howshaas ku dhammaataa ugu dambeyn 30 Nofember 1986

Qodobka 7aad

Guddoomiyaha Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed waxaa la farayaa meelmarinta, celinta iyo wareejinta maguurtooyinka kor ku xusan.

Qodobka 8aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Taariikh 11 Oktoobar, 1986.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

# TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

## QEYBTA SAD/XAAD

### MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Faadumo Axmed Xaashi.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 10 (Toban Jeeg War.) oo Lambarradooda iyo Lacagtooduba ay mid walba yihiin sidan hoos ku qoran:-

1) Jeeg War. Lr. 0647509 Sh.So. 100.000/=
2) Jeeg War. Lr. 0647510 Sh.So. 100.000/=
3) Jeeg War. Lr. 0647511 Sh.So. 100.000/=
4) Jeeg War. Lr. 0647512 Sh.So. 100.000/=
5) Jeeg War. Lr. 0647513 Sh.So. 100.000/=
6) Jeeg War. Lr. 0647514 Sh.So. 100.000/=
7) Jeeg War. Lr. 0069187 Sh.So. 50.000/=
8) Jeeg War. Lr. 069196 Sh.So. 50.000/=
9) Jeeg War. Lr. 069197 Sh.So. 42.451/=
10) Jeeg War. Lr. 567333 Sh.So. 11.930/=

kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda sida ku cad Warqadda Lam. 1458 ee Tr. 2.11.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad;

HADDUU ARKAY: Qod. sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii

WUXUU XEERIYEY

In La baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Lam. kor ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna qoran Wasaaradda Maaliyadda;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 4aad in ay siiso J.le Faadumo Axmed Xaashi Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 754.381/= oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Faaduma Axmed Xaashi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay Jeegaga War. Lr. kala yihiin 0257670-0654083 kuna jirto lacag dhan sh.so. 30.000-100.000 kuna qoran magaca J. W. Maaliyadda sida ku cad warqadda lamb. 001764 ee Tr. 1.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0257670-0654083 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Ke. Sh.So. 100.000-30.000 isugeyn 130.000 kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J. Faadumo Axmed Xaashi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 130.000 oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. [illegible]ddii inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin

Muqdisho, 2.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongola.

L. 657

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J. Faadumo Axmed Xaashi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J. War. Lr. 0624131 06224100 kuna jirto lacag dhan midkiiba sh.so. 100.000-10.000 kuna qoran magaca J. W. Maaliyadda sida ku cad warqadda Lr. 0639 Tr. 2.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Saddex.

HADDUU ARKAY: Qod. sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0624131-06224100 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Key. Sh.So. 100.000-100.000 isugeyn Sh.So. 200.000 kuna qoran magaca Wasaaradda Maaliyadda.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J. Faadumo Axmed Xaashi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000/= oo beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 2.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shongola.

L. 658

MAXKAMADDA G/TOGDHEER

UJEEDDO: Baafin Jeega War. ee Lr. yahay 0346238 ee Tr. Tahay 27.8.86

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeega War. ee lumay.

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga & Key. Laanta Burco.

MARKUUARKAY: Qod. 69 D,L, 9.9.65 Lumid Jeega War. Lamb. yahay 0346238 ee Tr. tahay 27.8.86, ee kuna qo ran yahay Cali Faarax Nuur, kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 100.000

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo cusboonaysiiyo Jeega War. ee kor ku xusan J/le Cali Faarax Nuur, kadib markii ay ka soo wareegto muddo dhan 20 casho, laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegaas cusub ee la sameyn doono in Gacanta laga saaro Daroor Ismaaciil Xuseen, iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO
Dr. Abuukar Islaw Cumar

L. 659

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGB/33/86 Taariikhda 8.11.86

UJEEDDO:- Digireeto Cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee lumay ee hoos ku qoran.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed ee Hargeysa

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Maxamed Ax- med Seed, ee ku taariikheysan 20.10.86, uuna ku Codsanaa- yo in loo Cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee ka lumay;

MARKUU ARKAY: Taarka ay Bangigu laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u wada direen Taariikhdu markay ahayd 25.9.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida ay Bangigu ku soo caddee yeen Jeegaggaas Wareega ee lumay Xaashidaas oo Taariikh- deedu tahay 4.11.86 ee Lambarkeedu yahay 0974, taas oo lagu soo caddeeyey sidan:-

1) Jeeg Wareega Lr. 0403585 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
2) Jeeg Wareega Lr. 0403586 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
3) Jeeg Wareega Lr. 0403587 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
4) Jeeg Wareega Lr. 0403588 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
5) Jeeg Wareega Lr. 0403591 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
6) Jeeg Wareega Lr. 0403592 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
7) Jeeg Wareega Lr. 0403593 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
8) Jeeg Wareega Lr. 0403594 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
9) Jeeg Wareega Lr. 0403595 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
10) Jeeg Wareega Lr 0403596 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed
11) Jeeg Wareega Lr. 0403597 ee 22.2.86 Sh.So. 100.000/= kuna qoran Maxamed Axmed Seed

oo dhammaantoodna laga wada sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad ee Hargeysa;

MARKUU ARKAY: In Jeegaggaas Wareega ee Lumay Lacagtooda uu iska leeyahay Maxamed Axmed Seed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegagga Wareega ee ah Kow iyo Tobanka Jeeg ee Lambarradoodu sare ku qoran yihiin, loona Cusboonaysiiyo Ninka isla leh lacagtooda oo ah MAXAMED AXMED SEED, Cusboonaysiintana Gacanta laga saaro isaga ama Ciddii Awood ka haysata MAXAMED AXMED SEED, Gacantana laga geliyo muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa, in uu Nuqulka Go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed ee Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 660

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJ: Baafin Jeegga War. ee Lr. yahay 731872;
Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeega Wareega ee lumay;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 9 D.L. (9.9.65 Lumid Jeegga Wareega ee lam. yahay 731872 Tr. 8.9.86 kuna qoran yahay Cali Xasan Maxamed, kuna qoran lacag dhan 35.000/= kun Sh.So.

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan J.le Cali Xasan Maxamed markii ay ka soo wareegto muddo dhan 15 casho gudahood laguna shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas Wareega ee la samayn doono gacanta laga saaro Cali Xasan Maxamed iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)
Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

(Xaliimo Cabdi Aadan) (Tanza'nia)
Burco, 22.11.1986
L. 661

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga soo qortay J.le Cali Daahir Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 2337 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.700.00/= kuna qoran magaca J.le Cali Daahir Cali sida ku cad warqadda lam. 470 ee Tr. 16.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo «Ammortamento» Buug Kayd Lr. 2337 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Siimaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.700.00/= kuna qoran magaca J.le Cali Daahir Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Cali Daahir Cali lacagta cadeedu tahay Sh.So. 1.700,00/= oo ah beddelkii Buug Kaydka kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 662

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xasan Cilmi Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 178052 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Shire Cali Cabdulle sida ku cad warqadda Lam. 12412 ee Tr. 26.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 178052 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran J.le Shire Cali Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaiyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Xasan Cilmi Maxamed lacagta cadadee du tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.11.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 663

MAXKAMADDA GOBOLKA BANA[illegible]

HADDUU ARKAY: Arjiga uu [illegible]
Maxamed Cabdi

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. [illegible] 0631011 kuna jirto lacag dhan S[illegible]. 100.000 kuna qoran magaca J/le Saleemaan Maxamed Cabdi sida ku cad warqadda Lr. La'aanta G. Tr. 2[illegible].86, ka soo ba[illegible] Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo[illegible]

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. [illegible]

WUXUU XEERIYEEY

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lamb. 0631011 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J. Saleemaan Maxamed Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Shanaad in ay siiso J/le Saleemaan Maxamed Cabdi lacag ta cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood [illegible] maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga [illegible] ka hore ysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 24.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 664

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 718648 kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise sida ku cad warqadda lr. 001874 ee Tr. 23.11.86, ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Xarunta

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 718648 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Xarunta kuna jirto lacag dhan sh.so. 20.000 kuna qoran magaca J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J/le Cabdiraxmaan Maxamed Ciise Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 20.000 oo ah bedelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka hore ysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 24.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 665

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Xuseen Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay ka lumeen Jeeg War. 730551 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Ibraahin Aar Xandule, sida ku cad warqadda lamb. 12487 ee Tr. 26.11.86 ka soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharci Lr. 2 ee Tr. 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 730551 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Ibraahin Aar Xandule.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J/le Cali Xuseen Rooble lacagta cadadedu tahay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/Buug keyd kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 27.11.86.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdi Salaad Shongole.

L. 666

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortayJ.le Maxamed Dhicisow Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay ka lumeen 5 Jeeg War. oo Lambarradooda iyo Lacagtoodaba ay mid walba yihiin sidan hoos ku qoran:-

1) Jeeg War. Lr. 212223 Sh.So. 100.000/=
2) Jeeg War. Lr. 212224 Sh.So. 100.000/=
3) Jeeg War. Lr. 212225 Sh.So. 100.000/=
4) Jeeg War. Lr. 9711 Sh.So. 50.000/=
5) Jeeg War. Lr. 9712 Sh.So. 40.000/=

kuna qoran magaca J.le Maxamed Dhicisow Faarax sida ku cad warqadda Lam. 12501 ee Tr. 30.11.86 ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta B.G.K.S. Khasnadaha Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

### WUXUU XEERIYEY

In la baa'iyo (Ammortamento) Shanta (5) Jeeg War. ee Lambarradooda kor ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baladweyne, ku-na qoran magaca J.le Maxamed Dhicisow Faarax.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baladweyne in ay siiso J.le Maxamed Dhicisow Faarax Lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 390.000/= oo ah beddelkii 5 Jeeg War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.
keenin.

Muqdisho, 30.11.86

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 665 /bis

SOPRAL S.P.A. «SOCIETA' PRODOTTI ALIMENTARI»
Saldhiggeedu: Muqdisho — Raasumaalka Sh.So. 1.000.000/=

Ogeysiis ISU YEERID FADHI CAADI AAN AHAYN

Saami qabayaasha Shirkadda Sopral — «Società Prodotti Alimentari» saldhiggeedu yahay Muqdisho, waxaa la isugu yeeray shirkii aan caadi ahayn, oo lagu qaban doono xaruunta Shirkadda Sopral maalinta 14 Disembar 1986, saacaddu markay tahay 10ka subaxnimo, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suurageli weydo, waxaa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 15ka Disembar isla saacadda kor ku xusan, si go'aan looga gaaro arrimo muhiim ah deg degna ah ee quseeya Shirkadda Sopral. Haddii ay suurto galiwaydo waxaa fadhiga la qaban karaa maalin kale ee isla bisha Disembere 1986.

BARNAAMIJKA DOODA

1) In Shirkadda Sopral la baabiyo laguna sameeyo liquidazione.

2) In la sugo magacaabidda labadii nin oo haray fadhigii Monza Brianza ee caadiga ahaa ee 9kii bishii Settembar 1986 loo xil saaray inay hingeliyaan go'aanadii labada dhinac ku heshiiyeen.

3) In la qeexo awooda labada liquidatore la go'aamiyana xuquuqdooda mudada ay socoto shaqadaas loo xil saaray.

4) In labadii arrimood ee lagu soo go'aamiyay shirkii caadiga ahaa ee 19.9.86 lagu hirgeliyo shirkaan aan caadiga ahayn ee kala ahaa:

b) In la baabiyo Guddiga Sare ee joogtadaa ee Maamulka Shirkadda Sopral S.P.A. lana joojiyo wixii xuquuq ah oo ay lahaayeen.

t) In la sii daayo shaqaalaha Shirkadda Sopral ayadoo laga reebayo oo kaliya in yar oo xafidda Warshadda mooyee.

5 — iyo wixii kale

GUDDOOMIYAHA SHIRKADDA SOPRAL
(Dr. Cabdullaahi Cilmi Bulbul)

AVVISO DI CONVOCAZIONE DELL' ASSEMBLEA STRAORDINARIA

Gli Azionisti della Società Prodotti Alimentari «SOPRAL» spa di cui sede Sociale a Mogadiscio, Capitale Sociale Shs. 1.000.000/= sono convocati in Assemblea Straordinaria presso la sede dello Stabilimento Spral il giorno 14 Dicembre 1986, alle ore 10 prima convocazione, ed occorrendo in seconda convocazione il giorno 15 Dicembre 1986, all astessa ora e nello stesso luogo per discutere questioni di estrema urgenza e importanza che riguarda la Società. In caso di forza maggioreil termine della riunione potrà essere prorogata una altro giorno delli stesso Dicembre, 1986.

ORDINE DEL GIORNO

1) Scioglimento e messa in liquidazione della Società Sopral SPA;

2) Conferma la nomina dei liquidatori, già convalidate nella deliberazione dell' Assemblea Ordinaria del 19.9.1986;

3) Determinazione dei Poteri dei liquidatori ed le relative remunerazioni;

4) Conferma e convalida altre determinazione dell' Assemblea Ordinaria del 19.9.1986 e in particolare:

a) Scioglimento Consglio di Amministrazione e cessazione emolumenti o remunerazioni di componenti.

b) Risoluzione e liquidazione rapporti di lavorocon il Personale dipendenti, mantenendo in Servizio solo il minimo indispensabile di Personale.

5 — Altri

IL PRESIDENTE SOCIET & SOPRAL
(Dr. Abdullahi Elmi Bulbul)

L. 666